



Dejinta Xeerarka Saameynta Isugeynta (Cumulative Impacts):

Hababka faallooyinka dadweynaha iyo talooyin

Gudbinta faallo dadweyne waa hab muhiim ah oo ay dadweynuhu uga qayb qaataan una saameeyaan dejinta xeerarka dowladda ee taabanaya noloshooda, caafimaadkooda, fayo-qabkooda, iyo deegaanka. Inkasta oo aysan jirin waajib ku khasbaya hay'ad dowladeed inay wax ka beddesho xeerarka iyadoo ku saleynaysa faallo dadweyne, haddana hay'aduhu waxay leeyihiin awood ay wax uga beddeli karaan xeerarka faallo gaar ah darteed.

Maxaa ka dhigaya faallo dadweyne mid wax ku ool ah?

Hadda, Hay'adda Xakamaynta Wasakheynta ee Minnesota (MPCA) waxay ku jirtaa geeddi-socodka dejinta xeerarka ee ku saabsan xeerka la soo jeediyay ee saameynta isugeynta (Cumulative Impacts), waxaana dhammaan faallooyinka dadweynaha ee la helo inta u dhaxaysa May – September 2026 loo gudbin doonaa oo dib u eegi doona garsooraha sharciga maamulka (administrative law judge). Garsooruhu wuxuu dib u eegi doonaa faallooyinka muddadan gudaheeda, wuxuuna mas'uul ka yahay go'aaminta in MPCA ay caddeysay baahida iyo macquulnimada xeerarka la soo jeediyay, isla markaana ay buuxisay shuruudaha ku habboon ee maaddo iyo habraacba. Garsooruhu inta badan wuxuu tixgeliyaa waxyaabahan soo socda:

- MPCA ma leedahay awood sharci ah oo ay ku dejin karto xeerarka ay soo jeedinayso?
- MPCA ma si cad bay u muujisay baahida iyo macquulnimada isbeddellada la soo jeediyay si ay si guul leh ugu daboolaan baahidaas, sida lagu sharaxay dukumeentiga Statement of Need and Reasonableness (SONAR)?
- MPCA ma buuxisay dhammaan shuruudaha habraaca ee dejinta xeerarka sida ku cad Qaybta 14 ee Xeerarka Minnesota?

Qaab-dhismeedka faallada dadweynaha



Hordhac

Sharax qofka aad tahay, sababta aad u xiisaynayso xeerkan, kuna muuji khibrad kasta oo aad u leedahay mowduuca oo ka dhigi karta faalladaada mid gaar ah. Tusaalooyin waxaa ka mid ah:

- Waxaad hadda ku nooshahay meel ay saameyn ku leedahay arrintan.
- Waxaad aqoon u leedahay taariikhda deegaanka ama waxaad halkaas ku nooleyd muddo dheer oo muhiim ah.
- Adiga ama goyskaaga waxaa jira xaalado caafimaad oo uu xeerkan saameynayo.
- Waxaad leedahay shaqo, khibrad xirfadeed, ama asal waxbarasho oo la xiriira warshaddan.



Asal

Si cad u sheeg qaybta ama qaybaha khuseeya ee xeerka, sharciga, ama dukumeentiga Statement of Need and Reasonableness (SONAR) ee aad faallada ka bixinayso.



Soo bandhig dood

Sharax doodaada oo ku dar caddeymo (tixraacyo waa waxtar)—tusaale ahaan:

- Haddii aad u aragto in MPCA ay si guul leh u caddeysay xeerka la soo jeediyay.
- Sida xeerka la soo jeediyay kuu saameynayo adiga iyo waxyaabaha aad muhiimka u aragto.
- Haddii hay'addu si sax ah u saadaalisay ama u qiyaastay saameyntaas.
- Saameynno kale oo aan la filayn oo ka dhalan kara habkan oo aan hay'addu tixgelin.
- Haddii faahfaahin dheeraad ah oo ka timaadda hay'addu ay kaa caawin lahayd inaad si fiican u fahanto xeerka.



Talooyin u jeedi Garsooraha

Sharax talooyinka aad u jeedinayso garsooraha, kuna caddee isbeddellada gaarka ah ee aad soo jeedinayso, tusaale ahaan, hab kale oo lagu xallin karo arrinta oo laga yaabo in hay'addu aysan tixgelin.



Gunaanad

Soo koob doodaada ugu muhiimsan, kadibna si kooban mar kale u tax talooyinkaaga.

Sida loo gudbiyo faallo dadweyne

Faallooyinka dadweynaha ee ku saabsan xeerka Saameynta Isugeynta waxaa lagu gudbin karaa qaabab kala duwan inta u dhaxaysa May–September 2026. Faallo kasta waxaa loo qiimeyn doonaa si siman. Hoos ka eeg hababka aad ku gudbin karto faalladaada:



Onlayn

Bogga eComments ee Maxkamadda Dhageysiyada Maamulka:: <https://minnesotaoah.granicusideas.com/> Sida loo isticmaalo eComments:: <https://mn.gov/oah/forms-and-filing/ecomments/>



Boostada Mareykanka ama keenis toos ah

Ku socota: Garsoore Kimberly Middendorf
Ku saabsan: Lambarka kiiska CAH 21-9003-39398
600 N. Robert St.
P.O. Box 64620
St. Paul MN 55164-0620



Fax: 651-539-0310

Ku: Garsoore Kimberly Middendorf
Ku saabsan: Lambarka kiiska CAH
21-9003-39398

Jadwalka ku-meel-gaarka ah ee faallooyinka dadweynaha ee Saameynta Isugeynta

May 18-July 17, 2026 (60 maalmood)	Sept. 1, 2026	Sept. 2-21, 2026 (20 maalmood)	Sept. 22-28, 2026 (5 maalmood)
Mudada faallooyinka dadweynaha ayaa furan	Dhageysiga dadweynaha	Mudada faallooyinka kadib dhageysiga	Mudada jawaab-celinta faallooyinka dadweynaha